



KOR U DHISKA ONTARIO



MIISAANIYADDA ONTARIO2015

MIISAANIYADDA 2015: **KOR U DHISKA ONTARIO**

WAX INTAA KA
BADAN KA OGOW
ONTARIO.CA/BUDGET

Ontario ayaa leh qorshe afar-qaybood ah oo lagu hubinayo inuu gobolku noqdo meesha ugu fiican ee lagu noolaado, laga soo bilaabo carruurnimada illaa hawlgabnimada, oo qof kastana haysto fursad u ku haleelo kartidooda dhammasyatiran.

Qorshuhu wuxuu maalgalinayaa hibada iyo xirfadaha dadka; dhisaa kaabayaasha bulshada sida waddooyinka iyo gaadiidka dadwaynaha, u abuuraa xaalad casrinimo iyo firfircooni u leh meheradda; oo u dhisayaa qorshe cusub oo hawlgab benshin ah waxtarna u leh hubinta sidii ay shaqaalaha Ontario u heli lahaayeen aasaas dakhli hawlgab xasilloon.

Difisdka 2014–15 waxa hadda lagu saadaalinyaa inuu noqdo \$10.9 bilyan — oo ah ka horumar \$1.6 bilyan ah marka loo eego saadalintii miisaaniyaddii 2014. Wada jir ahaan maamul maaliyadeed miyir leh iyo tallaabooyin lagu helo si ka fiican oo ka wanaagsan sidii hore in barnaamijyada iyo adeegyada dadwaynaha ee muhiimka ah ee ay dadku ku tiirsan yihiin lagu bixiyo, Ontario ayaa u heellan inay ka takhalusto difisdka illaa 2017-18.

Miisaaniyadda *Ontario ee 2015* ayaa kor ugu dhisaysa Ontario iyada oo loo maro maalgashiyo mudnaan leh, iyada oo la abuurto shaqooyin, oo fursadahana la badiyo, oo laxasiliyo doonta barwaaqada reer Ontario oo dhan.

KAABAYAASHA: MAALGASHIGII UGU WEYNA TAARIIKHDA ONTARIO

Ontario ayaa ku samaynaysa maalgashi noociisa hore aan loo arag in ka badan \$130 bilyan kaabayaasha dadwaynaha in muddo 10 sano ah. Faa'iidooyinka laga helay qorshaha kordhinta hantida dowladda oo ka badatay sidii la filayay awgeed, ayuu Gobolku u kordhinyaa lacagaha loo qoondeeyay Horumarinta Ontario (Moving Ontario Forward) illaa \$2.6 bilyan, oo wadar ahaan ah \$31.5 bilyan illaa 10 sano:

- Illaa \$16 bilyan oo ah mashaariic gaadiid dadwayne (transit) Maagaalo Waynta Aagga Toronto iyo Hamilton (GTHA); iyo
- Illaa \$15 bilyan oo ah mashaariic gaadiid iyo mashaariicda kale ee u mudnaanta leh ee ka baxsan GTHA.

Gudaha 2015-16, Ontario ayaa qorshaynaysa inay ku maalgaliso \$11.9 bilyan kaabayaasha ay ka midka yihiin waddooyinka, buundooyinka, gaadiidka dadwaynaha, nidaamyada biyaha, isbitaallada iyo dugsiyada abuuri doona shaqooyinka oo kobcinta doona dhaqaalaha.

Dawladda ayaa ku dhaqaaqaysa qorshe oodda lagaga qaadayo qiimaha hantida Goboleed oo dib looga maalgeliyo wadar ahaan faa'iidada ka soo baxda, iyada oo loo maro Trillium Trust, gaadiidka dadwaynaha, mashaariicda kale ee gaadiidka iyo kaabayaasha u mudnaanta leh, si loo xoojiyo dhaqaalaha Ontario oo loo dhiirigeliyo shaqo abuurista. Qorshaha waxa ka mid ah:

- Fidinta lahaanshaha Hydro One si loo abuuro dheefo dadwayne iyo dhowritaano dadwayne sii socod leh oo waara.
- Dib ugu fiirsiga tirada hantida ma-guurtada ah ee meelaha qiimaha badan ku yaal ee la iibinayo.

LA SHAQAYNTA MEHERADDA SI LOO ABUURO SHAQOQOYIN

Si loo abuurto shaqooyin ku filnaan iyo lacag bixin sare leh oo laga caawiyo meheradha Ontario inay guulaystaan oo kobcaan, ayuu Gobolku:

- Ku maalgashanyaa dheeraada ahaan \$200 oo milyan Fuundada Shaqooyinka iyo Barwaaqada si ay u soo jiidato maalgashiyo meherad dheeraad ah oo horseed u noqon doona waxtaabo cusub oo abuurto doona shaqooyin la abuurto, iyada oo ka dhigi doonta wadarta \$2.7 bilyan illaa 10 sano, oo u fidin doonta uqalmitaanka qaybta kaymaha.
- Ka qaybgalka abuuritaanka hindise cusub oo isku keeni doona koox waayo-aragnimo u leh arrinta oo ka kooban madaaxda sare ee meheradda oo keni doona lacagtoodda, aqoontooda iyo xiriiryadooda si ay uga caawiyaan meheradha bilowgaa ah Ontario onay koraan.
- In loogu sii wado, wixii ka gudubsan Maarj 2016, taageerada siciraynta korontada ah goobo warshadeedka waawayn ee waqooyi, oo taagera shaqooyinka iyo taramitaanka caalamiga ah.
- Kala shaqaynta Quebec sidii loo kordhin lahaa ganacsiga iyo maalgashi degmeedka.

SOO SAARKA XOOG SHAQAALE AAD U XIRFADAYSAN

Gobolka maalgashanaya dadka maanta oo siinaya reer Ontario taageerada ay ugu baahan yihiin sidii ay u heli lahaayeen xirfadaha habboon iyo shaqooyinka habboon si loo dhiso dhaqaalaha xoogga ee berrito iyada oo:

- In lagu sii wado horumarinta waxbarashada iyo tababbarka xirfadaha, laga bilaabo xannaanada iyo dugsiga barbaarinta maalin buuxda ah illaa barnaamijyada waxbarashada dugsiga sare ka damabysa iyo barnaamijyada barashada ganacsiga, sida kuwa waxyaabaha casriga leh ay ka midka yihiin barnaamijyada waxbarashada tijaabada waxqabashada leh.
- Maalgalinta Ontario Youth Jobs Strategy (Xeeladda Shaqooyinka Dhallinta Ontario) \$250 milyan oo dheeraad ah illaa muddo laba sannadood ah, iyada oo ay taasi ka dhigayso wadarta maalgashiga barnaamijyaada shaqada dhallinta in ka badan \$565 milyan.
- Casriyaynta Barnaamijka Gargaarka Ardayga Ontario (Ontario Student Assistance Program) si loo xoojiyo kaalmada lacageed ee ardayda.

BULSHO CADAALAD AH: KU NOOLAANSHO IYO KA SHAQAYN GUDAHA ONTARIO

Maadaama ay tahay habka hubaasha leh ee lagu noqodo bulsho barwaaqo ah in la hubiyo inay reer Ontario ay haystaan taageerada iyo fursadaha ay ugu baahan yihiin inay gaaraan kartidooda buuxda, Gobolka ayaa:

- Ugu sii kordhinaya saamiyada gargaarka bulsheed ee Ontario boqolkiiba hal dadka qaangaarka ah ee hela Ontario Works iyo dadka naafanimada leh ee qaata dheefaha barnaamijka Taageerada Naafanimada Ontario. Kuwa leh dakhliga ugu hooseeya, dadka qaangaarka ee qaata Ontario Works ee kalida ah caruurtana aan lahayn, ayaa heli doona ugu dar dheeraad ah.
- Hirgalinta qaybta xigta ee Qorshaha Ficilka Dhallinta — maalgalin sannadeed ku bilaabmaysa \$14 milyan gudaha 2015–16 oo u kordhaysa ku dhawaad illaa \$21 milyan gudaha 2016–17— looguna talagalay horumarinta natiijooyinka dhallinta halista-ku-jirta.
- Joojinta shaqaaqada galmada iyo xasaradaynta, iyo u horumarinta taageerada loogu talagalay dhibbanayaasha, iyada oo loo maro qorshaha *It's Never Okay (Marna Ma Habboona): Qorshe Ficil oo lagu Joojinayo Shaqaaqada Galmada iyo Xasaradaynta*.
- Horumarinta adeegyada daryeelka guriga iyo beesha iyada kordhiyo maalgashiyada celcelis ahaan boqolkiiba shan sannadkiiba, ama in ka badan \$750 milyan illaa saddexda sano ee xigta.
- Iyada oo horay loogu socdo xoojinta qorsheyaasha benschinka goobta shaqada iyo soo bandhigga Qorshaha Benschinka Hawlgabka Shaqaalaha Ontario gudaha 2017 si looga caawiyo dadka reer Ontario ee shaqeyaa ay u helaan mustaqbal hawlgab xasilloonidu ka badan tahay.

MAARAYNTA XILKA

Ontario ayaa u heellaan soo hooynta qiimaha ugu fiican ee suurtagalka ah doolar kasta oo la bixiyo, isla marka lagu sii wado maalgashiyada abuura shaqada, fidiya fursadaha oo xasiliya barwaaqo dhammaan reer Ontario. Dowladda ayaa sidaas ku samaynaysa iyada oo:

- U fiirsata sida doolar kasta oo dowladdu leedahay lagu bixinayo.
- Isticmaasha caddayn wax kala doorbid iyo horumarin natiijooyin lagu sameeyo.
- Ka eegta dhammaan dowladda habka ugu wanaagsan ee lagu bixiyo adeegyada.
- Qaadata arrimo abbaarid sannado-badan ah sidii loo heli lahaa fursado loogu talagalay barnaamijka dhaqaalaynta.
- Hubisa wixii kasta ee u kordhin mushqaayad caadi ah ee lagu gorgortamay iyada oo loo maray nidaamka gorgortankan loo dhan yahay ay dheellitirto dhaqaalayntu.

MIISAANIYADDA ONTARIO EE 2015

WAXYAABO DHEERAAD AH KA OGOW
[ONTARIO.CA/BUDGET](https://www.ontario.ca/budget)

TELEFOON LACAG LA'AAN AH: 1-800-337-7222

TTY LACAG LA'AAN AH: 1-800-263-7776